San Diego City Schools
Fact Sheet
Xilliga Gu'ga 2004

Sannadka 2007 Shuruudaha Dugsiga Sare looga Qalin-jebineyo

- **Imtixaanka Dugsiga Sare ee California looga Qalin-jebineyo (CAHSEE)**

  CAHSEE waxay ku siman yihiin heerarka dawlad-goboleedka ee af Ingiriisiga/Farshaxanka Luuqada, ilaa Fasalka 10aad iyo Xisaabta ilaa Aljebra1-2.

  Dhammaan adeyda dhigata dugsiyad guud ee California waa inay ku gudbaan imtixaanka CAHSEE si shahaado loo guddoonsiiyo. Imtixaanka CAHSEE wuxuu ka kooban yahay laba qeybood: akhriska/qoraalka iyo qeybta xisaabta.

  - Qeybta akhriska/qoraalku wxay leedahay su'aalo jawaabta saxda ah la dooraneyo iyo qoraal labadaba.
  - Qeybta xisaabtu waxay ka kooban tahay su'aalo jawaabta saxda ah la dooraneyo.

  Dhammaan ardeyda dhigata fasalka tobnaad waxaa looga baahan yahay inay imtixaanka galaan xilliga dayrta taariikhaha ay Waaxda Waxbarashadda ee California soo sameysay. Qeybaha xisaabta iyo akhriska/qoraalka maalmo kala duwan ayaa la kala gelayaa.

  Imtixaanka wakhti looma qaban, laakiin waxaa ardeydu maskaxda ku hayaan inay labada qeybood ee imtixaanku ka kooban yahay ku dhammeeyaan qiyaastii 5-1/2 saacadood.

  Haddii qeybaha Ingiriisiga/Farshaxanka Luuqada iyo xisaabta u ku gudbi waayo, wuxuu ardeygu imtxaankaas uusab ku gudbin bid u geli doonaa inta uu ku jiro fasalada kow iyo tobnaad iyo laba iyo tobnaad, ilaa uu labada qeyboodba ku gudbo. Ardeygu wuxuu xaq u leeyahay inuu imtixaanka galo sannadkii laba jeer

  Si loo hubsado inay ardeydu garaneyaan, isla mar ahaantaasna, fahmeyaan imtixaanka heerarka dawlad-goboleedka ee maadooyinkaas, waxaa ardeyda la siiyaa taageerada ay u baahan yihiin si ay imtixaanka u gudbaan. waxbarashadda degmadu waxay ardeyda ka kaalmeysaa wax dhisigta inta fasalka caadiga ah lagu jiro, iyo barnaamijyo ardeyda wax loo dhigeyo marka dugsiga laga baxo kedib iyo weliba dugsiga xilliga xagaaga ardeyda wax loo dhigo.

OO KOOBAN

Ardeyda qalinjebineysa sannadka 2004:

- **44 xilli dugsi dhibcahood ayaa loo baahan yahay si loo qalinjebiyo**
- **Ingiriisiga: 8 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Xisaabta: 6 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **PE: 4 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Saaynis: 6 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Cilmiga Bulshadda: 6 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Farshaxanka Shaqo : 3 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Doorashooyinka ah: 11 xilli dugsi dhibcahooda**
  - **Aqoonta Koombiyuutarka**
    - **Bandhigga ay sameyneyaan Ardeyda Sannadkaas dugsiu ugu dambeeyo**
    - **Ardeydu waa inay ku gudbaan labada qeybod ee imtixaanka CAHSEE**

- **Af Ingiriisiga:** Wadarta dhibcaha 8 xilli dugsi ayaa la isaga baahan yahay, waana inay 1 dhibic oo koorso ah ay Suugaanta Maraykanka ahmiyada saartaa. Masraxiyada, khudbad jeedinta, iyo saxaafada toona dhibcaha Ingiriisiga la iskuma siin doono. Masraxiyada waxaa dhibco lagaga helayaa qeybta muuqaalka iyo sameynta farshaxanka, saxaafadana waxaa dhibco lagaga helayaa farshaxanka gacanta lagu sameeyey. Barashadda af Ingiriisiga loo baraneyo Luuqad Labaad ahaan (ESL) waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo buuxinta shuruudaha af Ingiriisiga ee 8-xilli dugsi la isaga baahnaa.
- **Xisaabta:** 6 xili dugsiyeed dhibcahooda. 2 dhibcood oo Aljebra ah, 2 dhibcood oo Joometeri ahiyo 2 dhibcood oo xisaab dheeraad ah ayaa loo baahan yahay. Dhibcahaas waxaa lagu beddeli karaa koorsooyin heer-sare ah oo la qaato.
- **Ciyaaraha Jimicsiga:** 4 xilli dugsi dhibcahooda Waxyaabaha la dooraneyo waxaa ka mid ah ciyaaraha jimcsiga, ciyaarha fudud, ciyaaraha dugsiyada dhexmara, JROTC (Junior Reserve Officers Training Corps), kooxda baameyda, gabdhaha marka ciyaaruhu socdaan niikiya, wiilasha iyo gabdhaha ku ciyaara calamada. Dhammaan ardeyda fasalka sagaalaad waa isku qoraan xiisadaha Ciyaaraha Jmicsiga (PE).
- **Saaynis:** 6 xilli dugsi dhibcahoodasemester . 2 dhibcood oo Fisigis ah, 2 dhibcood oo Kimistari ah iyo 2 dhibcood oo Baayoloji ah. Dibcahaas waxaa lagu beddeli karaa koorsooyin heer-sare ah oo la qaato.
- **Cilmiga Bulshadda**: 6 xilli dugsiyeed dhibcahooda 2 dhibcood oo Taariikhda Adduunka iyo Juqraafi ah, 2 dhibcood oo Taariikhda iyo Juqraafiga Maraykanka ah, iyo 1 dhibic mid kasta oo ah barashadda Dawlada iyo Dhaqaalaha ama kuwa kale oo la dooran karo oo la ansaxiyey. Dhibcahan waxaa lagu beddeli karaa qaadashada koorsooyin sare.
- **Luuqadaha Adduunka iyo Muuqaalka iyo soo Bandhigista iyo farshaxanka gacanta lagu sameeyey:** 3 xilli dugsi dhibcahooda oo waxyaabahan soo socda midkood ikhtiyaar ahaan loo qaadaneyo:
  - **Ikhtiyaarka A:** 2 xilli dugsi oo luuqadaha adduunka ah(koorso hal sanno ah) iyo 1 xili dugsi oo muuqaaka iyo soo bandhigista iyo farshaxanka gacanta lagu sameeyey, ama
  - **Ikhtiyaarka B:** 2 muuqaalka iyo soo bandhigista farshaxanka ah iyo 1 xilli dugsi farshaxanka gacanta lagu sameeyey ah. Muuqaalka iyo soo bandhigista farshaxanka waxaa ka mid ah koorsooyinka farshaxanka, muusikada, iyo farshaxanada masraxiyada /tiyaatarka. Farshaxanka gacanta lagu qabaneyo waxaa ka mid ah koorsooyinka waxbarashadda ganacsiga, barashadda qoyska iyo dadka wax isticmaala (consumer), waxbarashadda warshadaha, barnaamijyada shaqooyinka iyo shaqooyinka xirfadaha, waxbarashadda telefishinka, saxaafada iyo buugga-sannadka.

-Wey Socotaa-

San Diego City Schools
Fact Sheet

- **Doorashooyin ah:** 11 xilli dugsi dhibcahood. Waxaa loo baahan yahay dhibcooyin dheeraad ah si loo buuxiyo 44 xilli dugsi dhibcood si loo dhammeystiro, taasna waxaa lagu heli karaa iyadoo koorsooyin dheeraad ah laga qaato maadooyinka kor lagu xusay ama koorsoyinka ROP loo yeqaano la qaato, luuqad ajinebi ah ama koorsooyin kasta oo kale oo la ansaxiyey.Additional credits needed to complete the required 44 semester credits may be earned by completing additional courses in subject areas specified above or by taking a Regional Occupational Program (ROP) course, a foreign language or any other approved courses.
- **Dhibcaha Shardiga ah:** 44 xilli dugsi dhibcohood ayaa la isaga baahan yahay inta lagu jiro fasalada 9aad ilaa iyo 12aad ugu yaraana Celceliska Buundooyinku (GPA) waa inay yihiin 2.0 si ardeygu uu u qalinjebiyo. Laba iyo soddon (32) dhibcahaas 44 xilli dugsi dhibcahooda ka mid ah waa in la helaa inta lagu jiro fasalka 10aad ilaa iyo 12aad.
- **Bandhigga ay sameyneyaan ardeyda uu sannadkaas dugsigu ugu dambeeyo:** Dhammaan ardeyda qalinjebineysa waa inay sameeyaan bandhigga looga baahan yahay ardeyda ku jirta sannadka dugsiga ugu dambeeya, taas oo ka mid ah shuruudaha qalinjebinta. Taasina waa fursa ay ku soo bandhigeyaan waxyaabihii ay soo barteen iyo heerka la rabo inay soo bandhigaan.
- **Aqoonta Koombiyuutarka:** Dhammaan ardeydu waa inay muujiyaan inay koombiyuutarka aqoon u leeyihiin inta ay ku jiraan fasalada 7aad ilaa iyo 12aad, iyagoo koorso la ansaxiyey qaadaneya ama inay si wanaagsan ugu gudbaan imtixaanka degmada.
- **Imaanshaha Dugsiga:** Dhammaan ardeyda dhigata fasalada 9aad ilaa iyo 12aad waa inay ka qeybgalaan siddeed xilli-dugsiyeed oo maalintiiba ay tahay lix xiisadood, haddii danta ardeyga darteed aan qorshe kale oo ka duwan loo sameyn. Maamulaha iyo waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa inay ansaxiyaan qorshayaasha kale ee diiwaangelinta ardeyda, taas oo ay ka mid tahay barnaamijka waxbarashadda la dedejineyo ama jadwal maalmeedka la soo gaabiyey, ee la-taliyaha waxbarashaddu uu qorshahaas ardeyga kula taliyey. Haddii barnaamjka ardeyga ee sannadkaas loo beddelo in ka yar lixdii xiiso ee uu qaadan jirey, waa in marka hore la wargeliya waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah.
- **Akhlaaqda:** Ardey kasta wuxuu masuul ka yahay inuu akhlaaq wanaagsan muujiyo. Ardeygu si uu uga qeybgalo xaflada qalinjebinta, waa inuu keenaa ugu yaraan 2.0 ee Celceliska Buundooyinka xaga akhlaaqda inta uu ku jiro sannadka dugsiga ugu dambeeya. Ardeyda ku jirta sannadka dugsiga ugu dambeeya looma oggolaan doono inuu ka qeybgalo xaflada qalinjebinta iyo dhacdooyinka kale ee ardeyda ku jirta sannadka dugsiga ugu dambeeya ay sameyneyaan haddii uu ku xad gudbo nidaamka waxyaabaha aan loo dul qaadan karin ama haddii shan maalmood dugsiga laga eryo inta uu ku jiro sannadka ugu dambeeya dugsiga. Ardeyga ku jira sannadka dugsiga ugu dambeeya ee celceliska buundooyinkiisa xaga akhalaaqdu ay ka hooseyso 2.0 ama dugsiga laga eryey in ka yar shan maalmood wuxuu u dacwoon karaa guddiga dugsiga si ay go'aan uga gaadhaan dhacdooyinka ardeyda sannadka dugsiga ugu dambeeya ay sameynayaan inta uu ka qeybgali karo. Buundooyinka Celceliska akhlaaqda waxaa lagu xisaabiyaa qiyaastan ah E=4, G=3, S=2, N=1, U=0.
- **Celceliska Buundooyinka:** Celceliska buundooyinka ee 2.0 ama in ka badan ayaa helitaanka deeqda waxbarashadda looga baahan yahay, waxaana lagu xisaabiyaa sidatan A=4, B=3, C=2, D=1, F=0. Celceliska buundooyinka qalinjebinta waxaa lagu xisaabiyaa korsooyinka lagu dhammeeyey intii la dhiganyey fasalada 9aad ilaa iyo 12aad. (Ardeydu waa inay kala tashadaan la-taliyaha waxbrashadda ee dugsiga warbixinada ku saabsan siyaabaha loo xisaabiyo celceliska buundooyinka ee koorsooyinka mar kale lagu noqdey.) Meeleynta sare(AP) iyo koorsooyinka shahaadad jaamacada ee caalamiga ah (IB), celceliska buundooyinka waxaa lagu xisaabiyaa cabbir ah shan dhibcood: A=5, B=4, C=3, D=1, F=0. Laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2000- 2001, Ardeydu waa inay qaataan imtixaanda loo yeqaano College Board AP ama IB si ay u helaan dhibco miisaan leh. Warbixinada koorsooyinka lagu cabbirka san-dhibcoodlaha lagu sameeyey dugsiga ayaa laga heli karaa. Ardeygu si uu uga qeybgalo barnaamijyada la xidhiidha waxyaabaha manhajka dugsiga ka baxsan sida dhacdooyinka ciyaaraha fudud ee dugsiyada dhex mara, waxaa looga baahan yahay inuu keeno celceliska buundooyinka 2.0 ee cabbirka afarta dhibcood xaga deeqda waxbarashadda iyo akhlaaqda labadaba. Waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah waa in talo bixin laga siiyaa siyaabaha lagu helayo deeqda ay dawlad-goboleedku bixineyso si laysagaga bixiyo kharashka imtixaanka meeleynta sare ee uu dhigeyo qoddobka 52244. (Ka timid Sharciyada California, Sharciyada Waxbarashadda, Qoddobka 48980)

SOMALI VERSION: 2007 HIGH SCHOOL GRADUATION REQUIREMENTS

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinta kala xidhiidh: Waaxda La-talinta iyo Haggida: (858) 627-7447
Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578 **www.sandi.net**

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."